
# Xaquuqda Kiraystaha ee Guri ka Saarida haddii lagu Xiro ama aad ka Baqayso inaad Dibadda u Baxdo

Renters' Rights in Eviction if you were Detained or Afraid to Leave your Home

Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa waxa la sameeyo haddii aad qaabilayso guri ka saarid sababta oo ah waxaa ku xirtay laanta socdaalka (immigration). Ama haddii aad ka baqayso inaad dibadda uga baxdo guriga sababtoo ah raadinta laanta socdaalka ee dadka muhaajiriinta ah.

## Ma bixin kiraddii waayo waa la xiray ama waxa aan ka baqayaa inaan shaqo aado. Qoladda guriga aan ugu jiraa khasab guriga ma iiga saari kartaa?

**Haddii aadan guriga ka tagin, qoladda gurigu waxa ay guriga kaaga saari kartaa uun iyagoo kiis maxkamad ka xareysta, la yiraa dacwo guri ka saarid ah.** Arrintani ma quseeyso waxa uu yahay sharciga aad wadanka ku leedahay, haddiina ay tani dhacdo, adiga ama qoyskaaga waa in la idiin keenaa warqaddo maxkamadeed. Warqadahu waxaa loo dhiibi karaa adiga ama waxaa lagu dhajin karaa albaabkaaga. Warqadahu waa khasab in ay ku qoran yihiin taariikh maxkamaddu qaadayso dacwadda guri ka saaridda ah. Eeg warqadan xogta aruursan ah ee guri ka saarida. Ka eeg xogtayada aruursan ee barta *Guri ka Saarida*.




Haddii aad guriga ayaan ka maqnayd, laakiin aad qorshaynayso inaad ku soo noqoto, u sheeg qoladda guriga inaadan tagayn ayna kuu qorshaysan tahay inaad wali sii ahaato kirayste.

Haddii qoladda gurigu ay khasab guriga kaaga saarto iyagoon marka hore maxkamad marin, sidda, haddii ay bedelaan qufulka ama ay saaraan albaabka, taa waxaa la yiraa guri ka xirasho. **Waa sharci-darro.** Haddii qolo guri laga kiraystay ay isku daydo inay guriga kaa bixiso iyagoo kaa goynaya biyaha, kulaylka ama korontadda, goyntaasi waa sharci-darro, xataa haddii kiraddii aadan bixin.

Haddii guriga lagaa xirto ama lagaa gooyo biyaha, wac qoladda guriga una sheeg inay taasi dambi tahay, sidda uu dhigayo sharciga Minnesota ee Minnesota Statute 504B.225. Haddii qoladda gurigu iysan kuu ogolaan inaad guriga ku noqoto, wac bilayska. Haddii ay taasi shaqeyn waydo, ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529.

## Maxaa sameyn karaa haddii kiradii la igu leeyahay?

Haddii kiradii lagugu leeyahay, aadna khatar u tahay in guriga lagaa saaro, isku day inaad caawimaad hesho markiiba. Haddii qoladda guriga aad uga jirtaa ay rabto inay kaa xareysato adiga dacwo guri ka saarid ah oo kiro bixin la'aan awgeed ah, waa khasab inay ku siiyaan 14-cisho oo ogaysiin ah ka hor inta aysan xareysan dacwo guri ka saarid ah. Ogaysiisku waa khasab inay ku jiraan cadadka dhan ee

lacagta ah ee la iska rabo iyo liis ay ku qoran yihiin waxyaabaha cayiman ee kale ee la iska rabo. Qoladda gurigu waa khasab inay gacanta kaaga keenaan ama ay boostadda kuu soo dhigaan ogaysiiska. Waxa aad u isticmaali kartaa ogaysiiska inuu kaa caawiyo inaad heshid gargaar dhanka kiradda ah. Qaar ka mid ah magaalooyinku waxa ay u baahan yihiin bixin ogaysiis intaa ka dheer ka hor inta aysan qoladda gurigu xareysan dacwo. Magaalooyinka, Minneapolis, Saint Louis Park, Brooklyn Center, haddii adigoo ku nool kiro lagugu yeesho, qoladda guriga aad uga jirtaa waa inay ku siiso 30-cisho ka hor inta aysan xareysan dacwo guri ka saarid ah.

**Ogow:** Brooklyn Park waa 30-cisho oo ogaysiis ah inay bixiso ilaa bisha Abriil 15, 2026. Richfield waa 30-cisho oo ogaysiis ah inay bixiso ilaa bisha Maajo 18.

Haddii aad bixin karto cadadka lacagta ah ee qoladda gurigu ay tiraa waa inaad bixiso waa aad ka badbaadi karaa xareynta dacwadda guri ka saarida ah ee adiga kaa dhanka ah ee kiro bixin la'aanta ah. Beeshaaddu waxaa dhici karta inay leedahay ururo dadka ka caawiya kiro bixinta. Dadka waydii taa.

Haddii aadan bixin karin cadadka lacagta ah ee ay yiraahdaan waa lagugu leeyahay ka hor aakhirka mudadda ogaysiiska iyo/ama haddii aadan ku raacsanayn cadadka lacagta ah ee ay leeyihiin waa lagugu leeyahay, waxa aad isku dayi kartaa inaad kala shaqeyso waanwaan qoladda guriga si kolkaa aysan uga xareysan dacwo guri ka saarid ah maxkamad.

Haddii aad heshiis waanwaan ah aad wada gaartaan qoladda guriga, qoraal ka dhig taa. Hubi in adiga iyo qoladda gurigana aad saxiixdaan.

Haddii qoladda aad guriga uga jirtaa ay xareysato dacwo guri ka saarid ah ka hor inta aan heshiiska la dhamaynin, keen heshiiska maxkamadda maalinta maxkamaddu dhacayso. Waydii maxkamaddu inay ansaxiso heshiiska. Waa inaad siddoo kale isku daydo in aad hesho in diiwaanka kiiska dacwada la masaxo (tirtirid) iyadoo taasi ay qayb ka tahay heshiinta. **Maxkamadda ha u goyn, xataa haddii aad heshiis la sameysay qoladda guriga.** Qoladda gurigu waa ay tagi karaan maxkamadda, haddii aadan adigu joogina, xaakimka waxaa dhici karta inuu amro guri ka saaridda.

Haddii aad danyar tahay, ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529. Waxa aad ka heli kartaa khayraadyo badan, xafiisyo gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ah, iyo caawimaadyo kale oo badan khadka (online): http://www.lawhelpmn.org/so. Uma baahnid qareen inuu heshiis kala shaqeeyo qoladda guriga, laakiin waa ay ku caawin kartaa taasi haddii aad mid hesho. Waa inaad taqaan sharciga iyo xuquuqdaadda.

## Ka waran haddii qoladda gurigu ay dacwo guri ka saarid ah maxkamadda ka xareysato?

Haddii qoladda gurigu ay jaa xareysatay dacwo guri ka saarid ah, waa khasab inay kaa siiyaan nuqul warqadaha maxkamadda. Warqadahaa waxaa la yiraa u Yeerida iyo Ashtakadda.

Sharciga Minnesota waxa uu yiraa qoladda gurigu waa inay kugu siiso warqadaha maxkamadda si cayiman. Haddii aysan qoladda gurigu kuu siin warqadaha sidda saxda ah, waxa aad codsan kartaa in kiiska la buriyo lana masaxo (tirtirid). Waa khasab in laguugu keeno warqadaha maxkamada ugu yaraan 7-cisho ka hor maxkamadda qaadideedda.

Haddii laguu keeno waxa la yiraa u Yeerida iyo Ashtakadda ee guri ka saarida ah, maxkamadda balanteeda tag waqtiga laguu qabto. Haddii aadan maxkamadda tagin, waa lagaaga guulaysan kiiskaaga markiiba imaansho la'aanta awgeed. Tag maxkamadda xataa haddii aadan difaac haysan si kolkaa aad u waydiisato maxkamadda ilaa 7-cisho si aad u guurto haddii uu qaxar ku hayso.

Ka eeg warqadda xogta aruursan ee guri ka saarida barta *Guri ka Saarida*.



## Tag maxkamadda xataa haddii qoladda gurigu ay ku tiraa uma baahnid inaad tagto!

Haddii aadan tagin maxkamadda waa lagaa guulaysan dood la'aan. Haddii lacag kiro ah lagugu leeyahay keen lacagta oo dhan maxkamadda, iyo waliba wixii khidmad la soo daahid ah ee lagugu leeyahay, khidmadda dacwo xareysiga ee qoladda guriga iyo khidmadda adeega. Khidmadda dacwo xareysigu waxa ay u dhaxeysaa $280 ilaa $400 iyadoo hadba ku xiran degmadaadda. Khidmadda adeegu waxa ay u dhaxeyn kartaa $30 iyo wax ka badan – laakiin waa khasab inay noqoto wax macquul ah. Maxkamaddu waxaa dhici karta inay ku siiso 7-cisho ka dib dacwo qaadidda inaad ku bixiso khidmadda, laakiin waa inaad waydiisato. Waxaad siddoo kale ka keeni kartaa warqad 'kafiil" ah dowladda ama hay'ad samafal oo balanqaada inay qoladda guriga lacagta siinayaan.

Haddii aad danyar tahay, ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529. Waxa aad ka heli kartaa khayraadyo kale oo badan, xafiisyo gargaarka dhanka sharciga (legal aid), caawimaadyo kale khadka (online) ah: http://www.lawhelpmn.org/so. Uma baahnid qareen ka dagaalama guri ka saarida laakiin taasi waa ay ku caawin haddii aad mid hesho. Waa inaad taqaan iyo sharciga xuquuqdaadda.

## Ma inaan xaadir u tagaa goobta dacwo qaadidayda?

Haddii kiiskaaga loo qabto balan dacwo qaadid oo xaadir la wada yahay, waxa aad xaq u leedahay inaad waydiisato xaakimka in dacwadaadda lagu qaado khadka adigoo gurigaaga jooga si kolkaa aadan u tagin maxkamadda. Uma baahid inaad cid u sheegto sharciga (immigration) wadanka aad ku leedahay si aad u hesho in dacwadaadda khadka lagu qaado. Maxkamaddu waxa ay ku haysaa tilmaamo iyo foomam (instructions and forms) khadka (online) si aad ugu waydiisato dacwo qaadid khadka ah. Waxaad kaloo wici kartaa maxkamadda ama waxa aad kala hadli karaa qareen sidda lagu codsado dacwo khad ku qaadidda.

Haddii aad danyar tahay, ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529. Qareen ayaa kuu waydiin kara maxkamadda in khadka dacwadaadda lagu qaado.

## Haddii lagaaga guulaysto kiiska guri ka saarid ah, muddo intee le'eg ayaan haystaa oo aan ku guuro?

Haddii lagaaga guulaysto kiiska guri ka saarid ah, xaakimku waxa uu soo saaraa Amrid Bixid ah (Amar saarid) ah oo adiga kaa dhan ah. Amriddu waxay kuu sheegtaa inay khasab tahay inaad guriga uga guurto 24-saac gudahood. Haddii aadan ku guurin 24-saac askari Shariif ah ayaa imaan kara khasabna kaaga saari kara guriga. Marmarka qaarkood waxaa dhici karta inay ku qaadato shariifku inuu soo noqdo muddo ka badan 24-saac.

Haddii aad is leedahay maxkamaddu khalad bay sameysay, waxa aad haystaa 15-cisho ka dib dacwo qaadidda si aad u xareysato racfaan. Haddii garsoore uu gaaray go'aanka, siddoo kale waxa aad xaq u leedahay inuu dib u eego dacwada xaakim buuxa laakiin degdeg ugu dhaqaaq taa. Waydiiso gacan yaraha maxkamadda foomamka. Hel talo dhanka sharciga ah markiiba.



Haddii adiga iyo qoladda guriga aad uga jirtaa aydnaan ku heshiin muddo intaa dheer, maxkamaddu kuma siin karto waqti ka badan 7-cisho oo aad ku guurto. U sheeg maxkamadda sababta aad ugu baahan tahay 7-cisho. U sheeg haddii ilmo, waayeel, ama cid naafa ahi ay guriga ku nooshahay. Waa khasab inaad dalbato waqtiga si aad u hesho.

Qoladda gurigu waa inay hesho in shariif ama askari bilays ahi uu ku keeno Amarka ka Bixidda Guriga ah adiga ama ay ku dhajiyaan albaabkaaga. Amarku waxa uu ku siiyaa adiga 24-saac oo aad ku guurto. Haddii aadan guriga ka bixin, qoladda gurigu waxa ay ka qabsataa balan maalin guurid ah iyo waqti shariifka. Qoladda gurigu waa khasab inay kuu sheegto marka shariifku imaanayo. Shariifku waa inuu meesho joogo si uu kormeero in alaabtaadii ay xirxireen ayna geeyeen meel kale oo lagu haynayo qoladda gurigu. Siddoo kale alaabtaadda waa la geyn karaan meel kale, Haddii gurga lagaa saaray, aad guurtay, ama aad cidlaysay aadna uga tagtay qaar ka mid ah alaabtaadda guriga, waxaa jira xeerar ku saabsan waxa ay qoladda gurigu ku sameyn karto alaabta. Qoladda guriga alaabtaada kuma daadin karaan wadadddda. **Dib waa aad u heli kartaa alaabtaadda, xataa haddii ay lacag kugu lahaayeen qoladda gurigu ah kolkii aad halkaa ku noolayd** oo ay ku jiraan kiro, khidmado, ama kharaashaad maxkamadeed. Qoladda gurigu waa codsan karaan lacagta laakiin kaama ay haysan karaan alaabtaadda waayo ma aadan siin lacagtoodii.

## Dacwadda guri ka Saaridda ahi ma ku jiraysaa diiwaankayga?

Xataa haddii lagaaga guulaysto maxkamadda, wali waa aad heli kartaa masaxid dacwada guri ka saaridda ah ha dhow. Waa ay adag tahay in la helo masaxid dacwada ah haddii kiiska lagaaga guulaysto, laakiin waa suurtagal.

Haddii aad dalbato masaxaad, hubi inaad u sharaxdo xaakimka ama garsooaraha sidda diiwaan kuuga jirida dacwada guri ka saariddu ay u saameysay noloshaadda. Ka eeg warqadda xogta aruursan ee barta wixii dheer ah *Tirtirada Guriga Ka Saarida.*

***Xog Aruursan oo ku saabsan macluumaad sharci ah ee MA AHA talo xagga sharciga ah. La tasho qareen.***
*Ha isticmaalin warqadan xogta aruursan ah haddii ay 1 sanno ka so wareegtay markii la daabacay. Na waydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska warqadda xogta aruursan ah ama inaad ku hesho qaabab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**